# Waxaan u baahanahay taageeradaada!

## ...waan kuu magdhabi doonaa wakhtigaaga.

**Qoysas Guulaysta 2020 "Successful Families 2020"** waa dadaal wadajira oo ay wadaan haya'ada aan faa'iido doonka ahayn ee IRCO, Latino Network, Adeega Qoyska ee Magaalada (Metropolitan Family Service), NAYA Family Center iyo SEI oo culayska lagu saarayo ka shaqaynta kordhinta natiijooyinka tacliimeed ee ardayda midabyada kale duwan leh iyadoo la maamuusayo sidoo kalena aqoonsiga dhaqanka la xiriira iyo nidaamyada jira lagu darayo barnaamijyada.

Qoysas Guulaysta 2020 "Successful Families 2020" wuxuu iskaashi la yeelanayaa **Dugsiga Dhexe ee H.B. Lee, Dugsiga Dhexe ee Reynolds** iyo **Dugsiga Sare ee Reynolds** si loo dhiirigeliyo jawi wanaagsan oo dugsigu yeesho sidoo kalena loo xaqiijiyo in ardayda midabyada kale duwan leh ee ka qalin jebiya dugsiga sare ay diyaar ugu noqon lahaayeen jaamacad iyo shaqo.

United Way of the Columbia-Willamette iyo Jaamacadda Gobolka Portland (Portland State University) ayaa hay'adahan aan faa'iido doonka ahayn iyo dugsiyadan kala shaqaynaya sidii ay ogaan lahaayeen waxyaalo dheeraad ah oo ku saabsan sida barnaamijyadoodu u caawiyaan ardayda marka dugsiga la joogo iyo marka laga maqan yahay. Si aad waxyaalo dheeraad ah uga ogaato waayo aragnimada ay ardayda iyo waalidiinta/daryeelayaashu ka heleen barnaamijyadani, waxaan u baahanay taageeradaada iyo oggolaanshahaaga.

Inta lagu gudo jiro sanad dugsiyeedka 2017-2018-ka waxaa laga yaabaa in aanu la xiriirno ardayda iyo waalidiintooda/daryeelayaashooda ka tirsan barnaamijyada ka jira H.B. Lee, RMS iyo RHS ee ka faa'iidaysta barnaamijyada la iska iskaashanayo ee Qoysas Guulaysta 2020 "Successful Families 2020".

Waxaa laga yaabaa in aanu la xiriirno ardayda iyo waalidiinta si ay uga qayb qaataan ra'yi ururinta, kooxaha la isku keenay ee talada dhiibanaya ama noocyada kale ee wareysi si wax looga ogaado waayo-aragnimada laga helay barnaamijyada iyo dugsiyadani. Ka qayb qaadashadu waa mid ikhtiyaari ah. Haddii aad jeclaan lahay in aad na caawiso, fadlan saxiix foomka ogolaanshaha ee la socda xirmadan.

Adeegyo la xiriira turjumaad iyo fasiraad ayaa la helayaa marka la codsado.

**WAAD KU MAHADSANTAHAY WAQTIGAAGA!**

# Guudmarka Ogolaanshaha

**Boggaga soo socdaa waxay sharaxaad ka bixinayaan ogolaanshaha ay waalidiinta, daryeelayaasha iyo ardaydu bixinayaan. Haddii aad ku raacsan tahay, saxiix bogga u dambeeya ee Foomka Ogolaanshaha.**

**Marka arday iyo waalidka/daryeeluhu labadooduba saxiixaan foomkan, waxaad:**

- ☐ **Na siinaysaa ogolaansho aan kugula soo xiriiri karno inta lagu gudo jiro sanad dugsiyeedka 2017-18 iyadoo ay suurtagal tahay 2018-19**
- ☐ **Nala soo socodsiinaysaa in aad rabto ka qayb qaadashada cilmi baarista adiga oo ka jawaabaya su'aalaha saabsan waayo aragnimada uu ardaygu/ay ardayadu iyo qoysku heleen ee la xiriirta marka dugsiga la joogo iyo marka laga maqan yahay.**
- ☐ **Noo ogolaanaysaa in aan eegno sidoo kalena isticmaalno diiwaannadaada ardaynimo sida, imaanshaha dugsiga, xeerarka waxbarasho, credit-ka, anshaxa iyo qalin jebinta**
- ☐ **Na siinaysaa ogolaansho aan ku isticmaali karno diiwaannada barnaamijka/adeega la iska kaashanayo ee Qoysas Guulaysta 2020 "Successful Families 2020" ee laga yaabo in ay kaa hayaan (arday ahaan iyo/ama qoys ahaan) si aad nooga caawisaan in aan si fiican u fahano waayo aragnimada aad hesheen**
- ☐ **Fahamsan tahay in jawaabaha shakhsi ee la bixiyo ee (arday ama waalid) aan la wadaagi doonin oo aanay noqon doonin kuwo la wada arko sidoo kalena aan lala wadaagi doonin macalimiinta, shaqaalaha dugsiga, waalidiinta iyo shaqaalaha kale ee ka socda hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn**
- ☐ **Fahamsan tahay in ka qayb qaadashada daraasadu iyo ka jawaabida su'aaluhu ay yihiin mid ikhtiyaari ah, oo aad joojin karto wakhti kasta**

# Foomka Ogolaanshaha

*Ogolaanshaha Ka qayb qaadashada Guud, oo uu ka mid tahay bixinta diiwaannada ardayee daraasadan:*

***Dejinta qorshe la xiriira Guusha Dhanka Tacliinta ah oo loogu tala galay Ardayda Midabyada Kala Duwan leh: Go'aaminta Siyaasaddo Wax ku ool ah iyo Nidaamyo ka jira Dugsiyada Dadweynaha***

Waalidiinta iyo ardaydoodu waa lagu martiqaaday in ay ka qayb qaataan daraasad cilmi baaris oo ay horseed ka tahay Ann Curry-Stevens oo ka socota Jaamacadda Gobolka Portland Qaybta Dugsiga Shaqada Bulshada (Portland State University School of Social Work). Daraasadani waxay ku saabsan tahay ardayda iyo qoysaska qaybta ka ah barnaamijyada taageerada waxbarashada iyo dhaqanka (sida kuwa ay bixiyaan Hay'ada Bulshada ee Muhaajirka iyo Qoxootiga (Immigrant and Refugee Community Organization), Latino Network, Metropolitan Family Service, Native American Youth iyo Self-Enhancement, Inc.) iyo ogaanshaha sida barnaamijyadani ay waxtarka ugu leeyihiin ardayda marka ay dugsiga joogaan iyo marka ay ka maqan yihiin. Waalidiinta/daryeelayaasha iyo ardaygooda waxaa lagu marti qaaday in ay ka qayb qaataan sababtoo ah arday ayaa isqoray mid ka mid ah barnaamijyadan.

Haddii uu waalidku go'aansado in uu ka qayb qaato daraasadan cilmi baaris, waxaa laga yaabaa in aanu ka codsano in uu isagu/in ay iyadu uu buuxiyo/ay buuxiso ra'yi ururinta ama ka qayb qaato/qaadato kooxaha la isku keenay ee talada dhiibanaya.  Ra'yi ururintani waxay weydiin doontaa su'aalo ku saabsan qoyska, dakhliga, asalka/qowmiyadda, iyo xaaladda nololeed, iyo sidoo kale su'aalo ku saabsan waayo aragnimada ay waalidiinta iyo ardaydu ka heleen dugsiga iyo fasalka. Waxaa suurtagal ah in ra'yi ururin kasta qaadato 30-45 daqiiqadood. Waalidka/daryeeluhu waxay heli doonaan magdhaw lacageed mar kasta oo ay ka qayb qaataan ra'yi ururinta.

Haddii waalidiintu go'aansadaan in ay dhalinyaradooda u ogalaadaan in ay ka qayb qataan, waxaa laga yaabaa in aanu dhalinyarada ka codsano in ay buuxiyaan ra'yi ururin ama ka qayb qaataan kooxaha la isku keenay ee talada dhiibanaya inta lagu gudo jiro sanad dugsiyeedka 2017-2018-ka. Waxaa laga yaabaa in aan ardayda la sii socono ka dib sanad dugsiyeedka 2017-2018-ka si loo sameeyo ra'yi ururintii u dambaysay. Ra'yi ururintani waxay ardayga/ardayada weydiin doontaa in ay dadka la wadaagaan fikradahooda iyo waayo aragnimadooda la xiriirta dugsigooda, macalimiintooda, bulshadooda, dhaqankooda iyo aqoonsigooda jinsiyadeed, iyo guud ahaan waxbarashadooda. Waxaa suurtagal ah in ra'yi ururin kasta qaadato 30-45 daqiiqadood si loo buuxiyo, laakiin ardaydu waxay heli doonaan magdhaw lacageed mar kasta oo ay dhamaystaan ra'yi ururinta.

Waxaan sidoo kale jeclaan lahayn ogolaansho aan ku fiirinayno diiwaannada waxbarasho ee qofka dhalinyarada ah, oo laga yaabo in ay ka mid noqdaan Aqoonsiga arday#, heerka fasalka, diiwaanka imaanshaha dugsiga, darajooyinka casharka iyo celceliska heerka dhibcaha, xaaladda dhaqaale, dhibcaha imtixaanka la dejiyay/la keenay, diiwaannada anshaxa iyo qalin jebinta. Waxaan ururinaynaa macluumaad badan sababtoo ah hay'addo ayaa naga codsatay in aan kala ogaano waxa shaqaynaya iyo waxaanan shaqaynayn si ardayda looga caawiyo in ay shaqo wanaagsan qabtaan dugsiga.

Waxaan eegi doonaa diiwaannada ardayga/ardayada inta lagu gudo jiro sanad dugsiyeedkan (2017-2018), labada sanad dugsiyeed ee soo socda (2018-2019 iyo 2019-2020), iyo sanadka la filayo in dugsiga sare laga qalin jebiyo. Warbixinta imaanshaha dugsiga iyo anshaxa la xiriira waxaa lala wadaagi doonaa shaqaalaha barnaamijka ee la shaqaynaya qofkaaga dhallinyarada ah si ay si fiican u taageeraan ardayda. Diiwaanada kale ee dugsiga, iyo sidoo kale wax kasta oo waalidka ama arday noogu sheego ra'yi ururinta, waxay noqon doonaan kuwo qarsoodi ah. Kaliya cilmi-baarayaasha qaybta ka ah daraasadan ayaa arki doona jawaabaha ra'yi ururinta ee qof kasta.  Cidna lama wadaagi doono wixii jawaabo ah ee wata magac qof ama macluumaadka shakhsi ee ay leeyihiin waalidka ama arday iyadoo aan lala wadaagayn macalimiinta, shaqaalaha dugsiga, waalidiinta kale, ama shaqaalaha ururada bulshada ee la shaqeeya ardayga/ardayada.

Go'aankiina (waalid ahaan iyo arday/ardayad ahaan ee labadiinuba) aad kaga qayb qaadaaysaan cilmi-baaristani waa mid ikhtiyaari ah. Xataa haddii waalidku bixiyo ogolaansho qofka dhalinyarada ahi kaga qayb qaadanayo, qofka dhalinyarada wuxuu wali dooran karaa in aanu ka qayb qaadan. Waalidiintu qasab maaha in ay ka qayb qaataan haddii ayna rabin, waxayna wakhti kasta dooran karaan in ay joojiyaan ka qayb qaadashada iyadoo aanay wax saamayn ah ku yeelan doonin xariirka waalidku ama qofka dhalinyarada ahi la leeyihiin ururka bulshada, dugsiga, United Way, ama Jaamacadda Gobolka Portland (Portland State University). Waalidiinta iyo ardaydu qasab maaha in ay ka qayb qaataan daraasadan si ay qayb uga noqdaan barnaamijyada uu bixiyo ururkaaga bulshadu.

Waalidiinta iyo dhalinyaradu ma heli doonaan wax faa'iidooyin ah oo gaar ah oo la xiriira ka qayb qaadashada ay ka qayb qaadayaan ra'yi ururinta, marka laga reebo iyadoo naga caawinaysa in aan waxyaalo dheeraad ah ka ogaano waxa shaqaynaya iyo waxaanan shaqaynayn si loo taageero kordhinta guul uu gaaro ardaygu/guul ay gaarto ardayadu. Waxaa jirta halis waalidka ama ardayda laga yaabo in ay la soo deristo oo ay jirto in wax dhibsadaan ama lumiyaan waxyaalaha u gaarka ah marka la weydiiyo su'aalaha qaarkood. Waalidka ama arday wakhti kasta ayay iskaga boodi karaan su'aal ama joojin karaan ka qayb qaadashada iyadoo aanay jirayn wax ciqaab ah oo la soo dersaysaa. Waxaan qaadi doonaa dhammaan wixii taxadar ah ee suurtagalka ah si looga hortago in la lumiyo sir ahaanshaha iyadoo diiwaannada warqadda ah lagu keydinayo xafiis xiran sidoo kalena diiwaannada elektarooniga ah lagu keydinayo seerfarka kambiyuutarka oo ammaan ah iyo kambiyuutaro lagu gelayo lambar/xaraf sir ah.

Haddii mid idinka mid ahi uu hayo wax su'aalo ah oo ku saabsan mashruuca cilmi-baarista ama ka qayb qaadashadiisa, kala xiriir Ann Curry-Stevens 503-725-5315. Haddii aad qabto walwal la xiriira xuquuqdaada ka qayb qaate cilmi-baaris ahaan, fadlan la xiriir Xafiiska PSU ee Daacadnimada Cilmi-baarista ee Dhismaha Suuqa Dhexe ee Qolka "PSU Office of Research Integrity at Market Center Building Suite" 620, Jaamacadda Gobolka Portland (Portland State University), ama wac 503-725-2227.

OGOLAANSHAHA WAALIDKA: **Saxiixida aad saxiixayso sanduuqa jaalaha ah ee hoosta ku yaala, waxaad sheegaysaa in aad fahamsan tahay macluumaadka kor ku qoran, in aad ogolaansho siinayso in qofka dhalinyarada ah ee aad dhashay ka qayb qaato/ay ka qayb qaadato daraasadan cilmi-baaris, iyo in aad ogoshahay in aad ka qayb qaadato daraasadan cilmi-baaris. Waxaad sidoo kale ku raacsan tahay bixinta ogolaanshaha iyo isdhaafsiga xogta ardayga/ardayada dhalinyarada ah oo ay ka mid yihiin magaca, Aqoonsiga#, heerka fasalka, dhibcaha imtixaanka la keenay, darajooyinka casharka iyo celceliska heerka dhibcaha, xaaladda dhaqaale, xogta imaanshaha dugsiga, iyo xogta anshaxa ee ka dhaxaysa Dugsiga Degmada Reynolds, Jaamacadda Gobolka Portland (Portland State University), United Way of Columbia-Willamette, iyo shaqaalaha cilmi-baarista iyo qiimeynta ee samaynaya daraasadan.**

***Macluumaadka Meesha Waalidka Lagala Xiriirayo*** e-mail-ka: ______________________ telefoonka: ______________________

Magaca Waalidka/Daryeelaha (Daabacan) | Saxiixa Waalidka/Daryeelaha | Taariikhda

Magaca Ardayga/Ardayada (Daabacan)

OGOLAANSHAHA ARDAYGA/ARDAYADA: **Saxiixida aad saxiixayso sanduuqa jaalaha ah ee hoosta ku yaala, waxaad sheegaysaa in aad fahamsan tahay macluumaadka kor ku qoran iyo in aad ku raacsan tahay ka qayb qaadashada daraasadan cilmi-baaris.**

***Macluumaadka Meesha Ardayga/Ardayada Lagala Xiriirayo*** e-mail-ka: ______________________ telefoonka: ______________________

☐ *Fadlan calaamaddee haddii, arday ahaan, aad ka weyn tahay 18 jir.*

Saxiixa Ardayga/Ardayada | Taariikhda